



## Ardayda Rieke oo isku daray farshaxanka iyo taariikhda iyaga sameynaya kildhiyo ‘teapots’

Dusha sare, xafladda shaaha oo loogu talagalay ardayda fasallada shanaad waxaa laga yaabaa in ay muuqato mid aan meelna haysan. Balse marka ay noqoto ardayda Dugsiga Hoose ee Rieke, xafladaha saddexda ee shaaha ee taxanaha ahay waxay ahaayeen meesha u wanaagsanayd ee ugu heerka sareysay cutubka kaasi oo isku keenay farshaxanka iyo taariikhda Maraykanka.

Dhammaan 75 arday ee fasallada shanaad ee dhigta Rieke waxay sameeyeen mashruuc dhanka farshaxanka oo ay hagaysay macallimada dugsiga ee Farshaxanka Ku takhasustay, Jill Mitchell. Mashruucani wuxuu ku lammaan yahay cutubka la baranayo ee ardayga ee ay ku jiraan barashada ku saabsan Xilliyadii Maraykanka La Gumaysanayay, oo ay ka mid yihiin Boston Tea Party, Kacaankii Maraykanka iyo Paul Revere. Fasalka waxaa ku jiray wada hadalo ku saabsan ganacsigii shaaha ee waagaasi, iyo sida is-addoonsigii qaybta uga ciyaaray.

Fasalka farshaxanka dhexdiisa, Mitchell waxay soo bandhigtay sawirka Revere (oo ahay farsamo yaqaan macdan qalinka wax ka sameeya ‘silversmith’) oo kor u haya kildhi ‘teapot’, isaga oo uu weheliyo sawir isagu leeyahay oo muujinaya kildhi ‘teapot’ uu sameeyay.

“Taasi waxay ahayd meeshii loo wada riyaaqay cutubka,” ayay sheegtay Mitchell.

Mitchell waxay sidoo kale ardayda tustay tusaalooinka farshaxanka casriga ah oo loogu talagalay dhiirigelin, ka dibna wuxuu ardayda faray in sameeyaan naqshado u gaar ah. Waxay isticmaaleen madooyin badan oo kale duwan, laga soo bilaabo bisada/mukulaasha Cheshire Cat ilaa laga gaarayo kooxda kubadda cagta ee Portland Thorns, laga soo bilaabo doolshaha koobka ku jira ‘cupcake’ ilaa laga gaarayo xayawaanka mala awaalka ah ee unicorn.

“Waxay dhammaan yihiin naqshado xiiso leh,” ayay sheegtay Mitchell.

Shaqada lagu sameynayay kildhiyadu ‘teapots’ waxay qaadatay laba bilood waxaana ka qayb qaataay Mitchell oo iyada u qaaday Dugsiga Sare ee Wilson oo meesha u dhow, halkaasi oo macallinka farshaxanka muuqalka ee Andrew Butterfield ay iyada u oggolaatay in ay isticmaasho foornada wax lagu qalijiyo ee dugsiga ‘kiln’ (Rieke malaha mid). Toddobaadkii la soo dhaafay Rieke waxay qoysaska ku martiqaaday in ay ka soo qayb galaan xafladda shaaha, oo mid kasta loogu talagalay mid ka mid ah saddexda fasal ee shanaad, iyadoo la bixinayay shaah iyo rooti gaaban (kildhiyada ‘teapots’ ardaydu sameeyeen looma isticmaali jirin in lagu bixiyo shaah, inkasta oo loo isticmaali kari lahaa).

Fasalka waxaa laga dhigay meel lagu soo bandhigo sawirka, oo leh kildhiyada ‘teapots’ la soo bandhigayo, iyada warqadaha wax lagu dhejiyo ‘Post-it Notes’ laga helayay meel kasta oo kildhi ‘pot’ yaalay si loogu ogolaado jawaab celinta laga helo ardayda iyo waalidiinta.

“Xafladda shaahu waxay ahayd meesha ugu heerka sareysay, ee dabaaldega cutubka la baranayay,” ayay sheegtay Mitchell.